Tijaabooyinka shaqo ee degmada – Xafiiska shaqada iyo horumarinta dhaqaalaha ee Uusimaa

Su'aalooyin iyo jawaabooyin

1. **Waa maxay tijaabada shaqo ee degmada?**
   Tijabooyinka shaqaaleeynta ee degmada waa mashruuc waddanka oo dhan ka soconaya in ka badan laba sano, kaas oo qeyb ka mid ah adeegyada shaqada ee xafiiska shaqada lagu wareejinayo degmada. Mashruuca tijaabada degmada waxaa ka qeyb ah 125 degmo iyo 26 goobood oo aay degmooyinka sameeyeen. Degmooyinka Uusimaa ee tijaabada ka qeybgalaya waa Helsinki, Espoo, Vantaa, Kerava, Porvoo, Raasepori iyo Hanko. Tijaabooyinka gobollada waxeey billaaban doonaan 1.3.2021 waxeeyna dhammaan doonaan 30.6.2023.

2. **Maxeey tijaabooyinka degmadu u billaabmayaan?**
   Barnaamijka dowladda ayadoo la raacayo, doorka degmooyinka sida abaabulayaasha adeegyada shaqada ayaa la xoojinayaa. Ujeeddooyinka tillaabooyinkaasi ayaa ah in la wanaajiyo helitaanka suuqa shaqada, gaar ahaan dadka muddo dheer shaqo la'aanta ahaa iyo kuwa nugul oo aay ku adag tahay helista shaqada. Intaas waxaa sii dheer tijaabooyinka waxaa loogu talogalay, in lagu horumariyo adeegyo taageera shaqo raadiyaha siduu shaqo ku heli lahaa iyo hababka adeegyada ee tixgeliya macmiilka baahida adeeggiisa shaqsi ahaaneed.

3. **Tan micnaheedu ficil ahaan maxay tahay?** Billaabista tijaabada degmada, qaar ka mid ah macaamiisha shaqo doonka ah ayaa macaamiil u noqon doona degmooyinka, halka aay qaar kalena aay ku sii nagaan doonaan xafiiska shaqada. Goortuu macmiilku u wareego tijaabo degmo, adeegyadiisa waxaa ka masuul ah ugu horreynba degmadiisa. Xafiiska shaqada waxaa ku hari doona qaar ka mid ah shaqooyinka loogu talogalay macaamiisha u wareegeeysa tijaabada degmada sida bixinta bayaan qoraaleedyada lacagta shaqo la'aanta ah, wareeysiyada iyo xulista tababarka shaqaalaha
4. **Tani miyeey aniga i khuseeysaa?**
   Waxaad u wareegi oo aad macmiil ka noqon tijaabada degmada, haddii:
   - Degaanka degmadaada aay ka tirsan tahay tijaabo degmeedka gobolka
   - aad iska diiwaangelisay shaqo raadis oo aad tahay shaqo la'aan, shaqada lagaa fariisiyay, shaqeeya ama adeeg kobciya howl shaqo haya
   - aad ka mid tahay kooxaha soo socda:
     - aad Kela-da ka heshid lacagta kaalmada shaqo raadinta ama lacag maalmeedka aasaasiga ah Kelasta
     - luqaddaada hooyo aayan aheyn finnish, iswidish ama saami ama dhalashadaada aayan aheyn Finnish
     - aad ka yar tahay 30 sano jir

5. **Ma in aan wax qabtaa?**
   U wareegista macaamiisha xagga tijaabo degmada waa mid u dhaceeysa si automaatik ah, uma baahnid in aad la xiriirto goobta tijaabo degmadaada ama xafiiska shaqada ee degmadaada sababtaas awgeed. U wareejinta macaamiisha xagga tijaabo degmada iyo macluumaadka la xiriira waxaa laguu soo dhigi boostada ama hab elektroonik ah xagga adeegga (oma asiointi-palvelu). Xafiiska shaqada waxuu ku siin karaa macluumaad adiga shaqsi ahaantaada, goorta aad ka macaamilooneeysid. Khabiirkaaga cusub ee ka masuulka ah adeegyada shaqo ee goobta degaankaaga ayaa kula soo xiriiri doona sida ugu dhaqsiyaha badan.

Haddii xiriirka macmiilkaaga uu sii joogo xafiiska shaqada, ma jiri doono ogeeysiis gooni ah, mana jiri doono wax isbeddel ah xagga macmiilkaaga.

6. **Sideen mustaqbalka iskaga diiwaangeliyaa shaqo doone ahaan?**
   Mar walba iska diiwaaangeli shaqo doone ahaan bogga internetka ee xafiiska shaqada adeegga aad leedahay ee loo yaqaan (oma asiointi-palvelu). Haddii aadan heysan aqoonsi bangi oo internet ah, aqoonsiga isxaqiijinta telefoonka gacanta ama kaar aqoonki elektroonik ah, waxaad iska diiwaangelin kartaa adiga oo isticmaalaya foomka internetka, taleefan ama xafiiska shaqada ee xaafaddaada, xataa haddii aad tahay macmiil tijaabada degmada. Khabiirkaaga cusub ee ka masuulka ah adeegyada shaqo ee goobta degaankaaga ayaa kula soo xiriiri doona sida ugu dhaqsiyaha badan.

   - Oma asiointi
   - Verkkolomake (asiointipalvelu.ahtp.fi)
   - TE-puhelinpalvelut
   - Paikalliset TE-palvelut

   Fiiro gaar ah! Xaaladda koroonaha awgeed, ka macaamilooshada baraha xafiisyadeenna waa la xaddiday. Ka akhri halkaan tilmaamaha adeegga:

   - Uusimaa TE Office in short

7. **Qorshaha shaqaaleeynteeyda ma ansax baa?**
   Qorshaha aad ka sameeysatid xafiiska shaqada ayaa sidoo kale kugu waajibinaya in aad u wareegtid macaamiil ka noqoshada degmada illaa iyo inta qorshe cusub halkaasi lagaaga diyarinayo. Qorshaha iyo howlaha lagu heshiiyay waxaa laga heli karaa bogga adeeggaaga ee xafiiska shaqada.

8. **Isbeddelku saameyn ma ku yeelan doonaa lacagta kaalmada shaqo la'aanta?**
   Isbeddelku saameyn kuma sameyn doono lacagta kaalmada shaqo la'aanta ee horay laguugu oggolaaday. Inta lagu jiro tijaabada degmada, lacagta shaqo la'aanta waxaa sidoo kale laga dalbadaa Kela-da ama khasnadda shaqo la'aanta.

9. **Maxaan ka yeelaa haddii aan u guuro degmo kale inta aay socoto tijaabada degmada?**
   Macmiilkaaga nafsi ahaaneedkaaga waxuu u wareegi doonaa goob degaanka degmadaada cusub, haddii aay ku lug leedahay tijaabooyinka degmada. Haddii degmadaada cusubi aaysan ku jirin tijaabada degmada, macmiilka waxaa loo wareejinayaa xafiiska shaqada, waana laguu soo sheegi doonaa halka macmiilkaagu u wareegi doono.

10. **Maxaan ka yeelaa haddii aan shaqo helo laakiin aan mar dambe shaqo la'aan noqdo?**
    Macaamiilnimada tijaabada degmada waxeey ku nagaan doontaa dhammaan waqtiga tijaabada degmada loogu talogalay micnaha illaa 30.6.2023.

11. **Xaggeen ka adeegtaa mustaqbalka?**
    Haddii macaamiil ahaantaada loo wareejiyo tijaabo degmo, waxaad ka daneeysan kartaa oo keliya adeegyada shaqada degmadaada ee rasmiga ah. Te-palvelut.fi –bogga internetka waxaad ka heli howlaha adeegga aad leedahay iyo guud ahaan talefoonnada xafiisyada shaqada ee waddanka oo

idilna weey shaqeeynayaan , waxaana ka heli kara macaamiisha tijaabada degmada. Haddii aadan awoodin in aad soo celiso dokumenti xagga adeegga kuu gaarka ah, waxaan ku soo celin kartaa warqad ahaan barta macaamiisha tijaabada degmada.

12. **Adeegyada aan helayo wax ma iska beddeleyaan?**
    Tijaabada degmada, waxaad ka heleeysaa khabiir kuu gaar ah iyo adeegyo la mid ah kuwa xafiiska shaqada. Adeegyada tijaabada degmada waxaa ka mid ah adeegyo caan ah oo dhiirigelinaya shaqaaleynta sida kaalmooyinka mushaharta, shaqo raadinta iyo tababarka shaqada, tababarka xoogga shaqaalaha, tijaabooyinka shaqada iyo waxbarashada iskaa ah oo lagu qaato gunnada shaqo la'aanta. Tijaabooyinka degmadu waxeey kaloo bixiyaan adeegyo la qabsasho sida uu qabo xeerka adeegga la qabsashada. Inta lagu gudo jiro shaqaaleeynta tijaabooyinka degmada, waxaa la horumarin doonaa adeegyo cusub oo xal loogu raadinayo daryeelka shaqaaleeynta, waxaana lagu sii xoojin doonaa adeegyo wadashaqeyn tusaale ahaan arrimaha bulshada iyo caafimaadka iyo adeegyo waxbarasho iyo tababar horumarin ee shaqaaleeynta.

13. **Maxaa dhacaya tijaabooyinka degmada ka dib?**
    Natiijooyinka tijaabooyinka degmada waxaa loo isticmaalaa qorsheynta adeegga mustaqbalka. Dowladdu waxeey soo bandhigi doontaa qaab dhismeedka adeegga joogtada ah inta lagu gudio jiro muddo xileedka dowladda. Shaqo dooneyaasha waxaa lagu wargelin doonaa waxii isbeddel ah ka hor dhammaadka muddada tijaabada degmada.